# Sayniska Akhriska

## Su'aalaha Aad Waydiin karto Dugsigaaga

Dugsigaaga maxaliga ah ma wuxuu adeegsadaa agab wanaagsan iyo istiraatiijiyado wax lagu baro si carruurta loo baro akhriska?

Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah su'aalaha la iswaydiiyo ee ku saabsan sayniska akhriska ee Open Houses, Shirarka Macalimiinta iyo Waalidka, iyo kulamo kale oo lala yeesho macalimiinta si wada hadalka loo bilaabo.

## Su'aalaha Guud

- **Waa maxay** habraaca aad adeegsado si aad u barto akhriska iyo qoraalka? (Fariin ku socota waalidiinta: Waa inuu noqdaa habraac akhriska iyo qoraal oo qaabaysan, waana inuusan noqon akhriska isku dheelitiran ama luuqada oo dhan.)
- **Waa maxay manhajyada** ama barnaamijyada aad adeegsato? (Fariin ku socota waalidiinta: Waxaa jiri kara hal mid ka badan, laakiin agabyada ugu wayn ee la adeegsado waa inay yihin kuwo gobalku ansixiyay.)
- **Waqti intee le'eg** ayaad ku qaadan kartaa inaad bixiso tilmaamo toos ah adoo adeegsanaya agabyadaas maalin kasta? Asbuuc kasta? (Fiiro ku socota waalidiinta: Ma fiicna haddii ay kaliya ku qaataan boqolkiiba wax yar waqtiga barashada akhriska iyo qoraalka iyadoo la adeegsanayo agabyada uu ansixiyay gobalku.)

## Dugsigu ma raacaayo miyaa sayniska akhriska?

Doorkaaga ka waalid ahaan waa muhiim marka la eego  gobalka Ohio, oo ah gobal "xakameynta maxaliga ah". Halkaan waxaa ku qoran qaar kamid ah tallaabooyinka ay tahay inaad qaadato haddii macalin ama dugsi uusan raacin sayniska akhriska:

- **La hadal macalinka iyo maamulaha dhismaha** (Maamulaha ama Kaaliyaha Maamulaha, tusaale ahaan) iimayl u dir ama la kulan si aad ula wadaagto walaacyadaada. La wadaag sharciga gabalka iyo Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) bogaga webka Read Ohio ee taageerata walaacyadaada.
- Haddii aad wali qabto walaacyo: **La wadag** hogaamiyaha **degmada** (Kormeeraha Guud, ama haddii Cunugaagu aado Community School la hadal cida maalgelisa dugsiga).

Ohio Statewide Family Engagement Center at The Ohio State University

Ohio Department of Education & Workforce

- Haddii aad wali qabto walaacyo: **La hadal guddiga waxbarashada ee dugsigaaga maxaliga** ee ansixiyay siyaasadaha iyo habraacyada dugsiga cunugaaga. Xogta lagala xariiro guddiga dugsiga waxaa laga heli karaa webseedka degmada ama buug gacmeedka ardayga.
- **La hadal waalidiin kale oo qaba walaacyo** iyo dugsiga u dira fariin idinkoo koox ah. Waalidiinta kale ee Ohio waxay kusoo guuleysteen istaraatiijiyadaan.
- Haddii aad u baahan tahay caawimaad la xariirta la shaqeynta guddiga dugsiga ama degmada: **La xariir Iskuduwaha Aagga**. Waxaa jira liis xogta xiriirka oo laga heli karo webseedka Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Ohio.
- Haddii aad sameysay dhammaan tallaabooyinkaan oo dugsigaaguna uusan wali raaceen sayniska akhriska: **Iimayl u dir** ombudsperson@education.ohio.gov, qof sameeya baaritaano, warbixino ku saabsan iyo caawimaada wax ka qabashada walaacyada.
- Haddii cunugaagu helaayo Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah: **Gudbi cabasho** adoo adeegsanaya nidaamka Xallinta Khilaafka ee Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee ohio.

## Su'aalo ku Saabsan Akhriska iyo Qoraalka Cunugaaga

Waa arrin fiican inaad weydiiso macalimiinta su'aalo gaar ah oo ku saabsan halka cunugaagu ka maraayo waxbarashada iyo inuu hayo wadada saxda ah ee uu ku gaaraayo heerarka yoolka fasalka.

### Ku socota Qorayaasha iyo Akhristayaasha Yaryar

- Heerka akhriska ee cunugayga miyuu yahay, ka sareeyaa ama ka hooseeyaa heerka fasalka?
- Waa maxay **dhawaacyada xarafka** ee cunugaygu yaqaan?
- Maku dhawaaqi **karaa** erayada kadibna ma isku dabaqi karaa dhawaacyada si auu u akhriyo?
- Waa maxay xirfadaha **akhriska** ee gaarka ah ee cunugaygu horey u martay, waana maxay xirfadaha uu hadda baranaayo?

  Tusaale ahaan:
  - shaqal gaabyada(cat, pop)
  - isku darka - labo ama kasii badan oo ah shaqal dhaadheer oo taxan (flag, jump)
  - sawiro – labo xaraf oo abuura hal dhawaaq (ship, path)
  - qarsoon ama cajiib ah “e” (kite, mile)
  - koox shaqal gaab ah (rain, play) etc.
  - erayada leh xarafka-r (for, car, her)

- Waydii macalinka nuqulada **liisaska xirfadaha (xajmiga iyo sida ay iskugu xigxigaan)** oo waydii liiska cunugaagu ka sameynaayo horumarka fiican iyo meelaha ay tahay inuu ka sameeyo muraajaceyn.
- Waa sidee **farta qoraalka** ee cunugayga iyo habka uu erayada isku keenaayo? (Ma waxbaa ka qaldan mise aad bay u fican tahay?)
- Ma wuxuu ku dhawaaqi waayaa qayb kamid ah erayada si uu **u** hikaadiyo?
- Waa maxay **erayada adag** ee aan ku adkeyn inuu ku dhawaaqo? (Fariin ku socda waalidiinta: Kuwaan mararka qaar waxaa loo yaqaan erayada cassaanka ah, kuwa inta badan la adeegsado, ama erayada la arki karo)
- Waa maxay noocyada erayada gaarka ah ee uu ku qabo dhibaatada?
- Cunugagu maku **jiraa koox yar** oo sameeya akhriska iyo qoraalka? **Waa maxay shaqada ay ku qabanayaan** kooxdaas? Waa maxay agabyada loo adeegsado kooxahaan yaryar? Sidee waqtiga kooxda yar gacan uga geystaa inay bartaan xirfado gaar ah oo ay ka shaqeynayaan?
- Maxaan ku sameyn karaa guriga?

### Ardayda Waawayn/Heerarka Sare kujira

- Heerka akhriska ee cunugayga miyuu yahay, ka sareeyaa ama ka hooseeyaa heerka fasalka?
- Waa sidee horumarka uu ka sameynaayo cunugayga akhrinta iyo hikaadinta **erayada waawayn** AMA maku dhibtoonayaa inuu akhriyo uuna hikaadiyo erayada yaryar?
- Waa maxay **noocyada xarafyada** uu xifdiyay? Majiraa kuwo uu ku dhibtoonaayo?
- Waa maxay **erayada aasaasiga, xarafyada hore, xarafyada dambe** ee uu bartay? Majiraan wax dhibaato ah oo uu ku qabo kuwaan?
- Waa maxay **xirfadaha qoraalka** ee uu ka shaqeynaayo? Dhibaato maku qabaa habka loo abuuro jumlada ama qorista warqadaha dhaadheer?
- Ma u muuqdaa **inuu fahamsan yahay** marka uu akhrinaayo agabyada heerka fasalka?
- Ka codso macalinka nuqulada **liisaska xirfadaha (xajmiga iyo sida ay iskugu xigxigaan)** ee ay isticmaalayaan si aad u calaamadeyso meesha cunugaagu ka sameynaayo horumarka ama uga baahan yahay taageero dheeraad ah.
- Maxaan ku sameyn karaa guriga?

Arday kasta wuxuu u qalmaa fursada ugu fiican ee lagu guuleysto inuu helo, taasina waxay dhacdaa marka aan dhammaanteen ka wada shaqeyno ardayda. Macalimiintu waxay u baahan yihiin caawimaadaada ku aadan xirfadaha akhriska iyo qorista marka cunugaagu joogo guriga, waxayna ka jawaabi karaan su'aalahaaga ku saabsan sida ay taasi u dhici karto.

Si aad u hesho ilo dheeraad ah oo loogu talagalay waalidiinta, booqo webseedka Xarunta Ka-Qaybqaadashada Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan.

**Su'aalo** ku saabsan macluumaadkaan? Waxaad iimayl u diri kartaa ReadOhio@education.ohio.gov.

**Maarso 2025**